5.
Musalifnimada Ikhtiyaariga ah

Haddii aadan awoodin inaad bixiso deyntaada oo aadan la geli karin nidaam lacag bixin ah oo haboon deyn bixiyahaaga, waxaa laga yaabaa inaad si ikhtiyaari ah u xareyso codsi ah inaad noqoto musalaf.

Codsigaaga musalifnimada waxaa laga yaabaa inaan la aqbalin haddii ay u muuqato in macluumaadka lala xareeyo inaysan u ekayn inaadan awoodin bixinta deyntaada. IYO inaad ka leexleexaneyso bixinta deynta/deymahaas, gaar ahaaneed, ama hadda ka hor aad musalaf noqotay.

Deynmeysanuhu xaq uma laha inuu codsiga deynmeysanaha u soo gudbiyo musalifnimo haddii aysan Australia joogin ama aysan la lahayn wax xiriir ah Australia (tusaale deynmaysanuhu badanaa kuma noola Australia kumuuna sameeyo wax ganacsi ah deynmaysanuhu Australia).

Cawaaqibka musalifnimadu waa darran yihiin. Musalifnimadu guud ahaan waxay qaadaneysaa xili dhan saddex sanno laakiinse xaaladaha qaarkood waa la dheereyn karaa. Waxaa jira diiwaan joogta ah oo musalifnimo oo ku jiraya Tusaha Musalifnimada Qaranka (diiwaanka dadweynaha ee elektarooniga ah oo uu qof waliba isticmaali karo isagoo lacag bixinaya). Deyn bixiyaha waxaa lagu wargelinayaa musalifnimadaada.

Wakiil ayaa la magacaabaa si uu u maamulo musalifnimada. Si lacagtooda loo siiyo deyn bixiyaha, wakiilkaaga ayaa:

- iibinta hantidaada (inkastoo oo aad awoodi doonto inaad heysato hantida noocyo ka mid ah)
- qaadashada dakhli kasta oo aad shaqeysato ilaa xad
- baadh arimahaaga lacagta waxayna soo heli karaan hantida aad qof kale ku wareejisay oo aadan tixgelin ku filan siin ka hor musalifnimadaada ama laga yaabo inaad hesho xeliga aad musalifka tahay.

Waxaad dooran kartaa inaad magacowdo wakiil diiwaangashan adoo helaya oo siinaya ka raali ahaanshaha markaad xareyso codsigaaga aad ku noqoneysid musalifka. Haddii aadan dooran wakil , AFSA ayaa kuu balamin karta wakiil diiwaan gashan oo laguu magacaabo.

Haddii kale, Wakiilka Rasmiga ah ayaa bilow ahaan la magacaabaa si uu u maamulo dhulkaaga. Deyn bixiyahaaga ayaa laga yaabaa inuu doorto bedelaada wakiilka wakhti kasta.

Waajibaadka wakiilka waxaa lagu sheegay sharciga wakiiladuna waa inay raacaan xeerar ka qaarkood markay maamulayaan dhulkaaga.

A. HANTIDA

Hantidu waa wax kasta oo qiimo leh oo aad leedahay markaad noqoto musalif iyo weliba wax kasta oo aad soo iibsato ama aad hesho kahor musalifnimadaada.

Hantida qaarkeed waa la dhaafayaa, oo micnaheedu yahay waxaa laga yaabaa inaad heysato. Hantida qaarkeed lama dhaafayo ama lama qaybinayo, oo micnaheedu yahay wakiilkaagu waxaa laga yaabaa inuu iibiyo si ay uga faa'iideystaan deyn bixiyahaagu.

HANTIDEE BAAN HEYSAN KARAA?

- Badiba alaabta shakhsiyeed ama guriga.
- Qalabka loo isticmaalo in dakhli lagu kasbado, ilaa iyo xad*.
- Gaadiidka (baabuurta ama mootooyinka), meesha qiimaha baabuurta oo dhami oo laga jaray wadarta lagaaga leeyahay ay ka yar tahay ilaa xad*.
- Lacagta badideeda ee lagu hayo sanduuqa lacagta hawl gabka ee diiwaangashan iyo lacag bixinaha ka imanaya sanduuqa lacagta hawl gabka sharciyeysan ee aad hesho kadib markaad noqotay musalif (Ogow: lacag bixitna hawl gabka ee aad heshay kahor musalifnimada maaha mid ilaashan).

- Qorshayaasha ceymiska nafta ee adigu aad leedahay ama xaaskaagu ama lacagta qorshayaashan ee aad heshay musalifnimadaada ka dib.
- Magdhowga dhaawaca shakhsiyeed, tusaale dhaawac adiga ku soo gaadhay oo gaadhiyeed ama magdhowga shaqaalaha.
- Hantida ilaa xadka lagu soo iibiyey lacagtaada magdhowga shakhsiyeed ama deeqaha dawlada qaarkood (lacagaha ilaashan).
- Hantida aad adigu ugu heysid ammaano ahaan qof kale
- qofka (tusaale, xisaabta bangiga ee ilmaha).
- Abaalmirinada cayaaraha, dhaqameed, ciidamada ama waxbarasho ee adiga lagu siiyey, sida biladaha ama koobabka ee loo arko inay leeyihiin dareen ahaan qiimo waxaa laga yaabaa in laga dhaafo codka deyn bixiyaha.

HANTIDEE BUU IIBINAYAA WAKIILKEYGU?

Ka sokow hantida aad heysan karto, wakiilkaagu wuxuu soo helayaa wixii hanti ah xitaa haddii ay dibeda jiraan wax hanti ahi ama qof kale hayo. Tusaale waxaa ka mid ah:

- guryaha, abaartamantiyada dabaqa ah, dhulka, guryaha ganacsiga iyo beerta (oo ay ku jiraan kirada)
- baabuuta marka laga reebo kuwa aan la dhaafeynin, saamiyada iyo maalgelinta kale (oo ay ku jiraan saamiyada
- lagu hayo ganacsiga loo shaqeeyahaaga)
- lacagta cashuurta lagaaga soo celiyo ee aad shaqeysay kahor intaadan musalifka noqon
- lacagta guriga lagaaga dhintay halkaas oo qofku uu dhintay kahor ama intii aad musalifka ahayd
- abaalmarinta tartamada kale iyo bakhtiyaanasiib ku guuleysiga.

Digniinta: Waxaa jira ciqaabo haddii aad ku guuldareysato:

- inaad ku sheegto hanti Qoraalka Arimahaaga, ama
- inaad u sheegto wakiilkaaga, iyadoo qoraal ah , 14 maalmood gudahood wixii hanti ah ee aad hesho intaad musalifka tahay.

KA WARAN HANTIDA AAN LA LEEYAHAY QOF KALE?

Haddii aad saami ku leedahay hanti, tusaale guri, wakiilkaagu wuxuu iibin karaa saamigaaga. Haddii qofka kula leh uusan sidoo kale ahayn musalif, wakiilku wuxuu ogolaan karaa inuu ka iibiyo saamigaaga isaga laakiinse waxay noqoneysaa ilaa inta uu wakiilku kaga heli karo kuu iibinta suuqa furan.

HANTIDEE BAAN DAMMAANAD LEH OO AY DEYN BIXIYAHU XAQ U LEEYIHIIN INAY QAATAAN?

Deyn bixiyaha dammaanada leh waa ka u heysta dammiin hantidaada. Tusaalayaasha caamka ah ee dammaanada leh waa:

- guri deyn bangiga looga qaatay
- gaari la iibinayo
- alaabta loo soo kireystay si loo iibsado haddow, alaab la qaadi karo oo deyn lagu iibsaday, kireysi ama ogeysinta iibka lala galay shirkada maalgelisay.
- Dhul golaha degaanku lacag ku leeyahay.

Deyn bixiye dammaanad leh ma ceshan karo hantida sababtoo ah waxaad tahay musalif. Si kastaba ha ahaatee haddii aad lacag bixinta dib uga dhacdo way qaadan karaan oo iibin karaan haddii aad musalif tahay iyo haddii kaleba. Haddii shaki kaaga jiro in mid ka mid ah deyn bixiyahaagu uu dammaanad leeyahay waa inaad marka hore weydiisaa deyn bixiyaha. Haddii aad weli ka shakisan tahay weydii la taliyaha lacagta ama wakiilkaaga.

*caddadka hadda la kordhiyey fadlan eeg caddadka la kordhiyey website ka AFSA www.afsa.gov.au

KA WARAN ALAABTA AAN LAHAAN JIREY?

Wakiilkaaga ayaa baadhi doona hantidaad lahayd shanti sanno ee ka horeysay musalifnimadaada. Haddii ay helaan inaad bixisay ama iibisay wax hanti ah wax ka yar waxay suuqa ka joogaan , waxaa laga yaabaa inay hantidaan soo helaan ama inta u dhaxeysa qiimaha dhabta ah ee hantida iyo caddadka aad ku iibisay. Wakiilaakaga waxaa laga yaabaa inuu sidoo kale helo wixii hanti ah ee aad u wareejisay si aad uga adkaato deyn bixiyahaaga (oo ay ku jirto hantida la wareejiyey wax ka badan shan sanno musalifnimadiisa).

KA WARAN DACWADAHA SHARCIGA AH EE LAGA YAABO INAAN QOF U HEYSTO?

Haddii aad haddaba ka bilowday fal sharci ah maxkamada, ama haddii aad rumeysan tahay inaad heyso dacwad sharci ah laakiinse aadan bilaabin fal maxkamadeed, ma sii wadi kartid falkaas ama bilaabi kartid fal cusub mar haddii aad musalif noqotid. Waxay jirtaa wakiilkaagu inuu go'aamiyo in dacwadaan la sii dabago iyadoo la eegayo faa'iidada ay u leedahay deyn bixiyahaaga. Si kastaba, dalabkaagu ma wuxuu ahaanayaa dhaawac shakhsiyeed ama khalad lagugu sameeyey, xaaskaaga, ama xubin qoyskaaga ka mid ah, waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay inaad dabagasho dacwadaas xitaa markii aad noqotay musalif ka dib. Waxaa muhiim in laga wadahadlay arimahan wakiilkaaga oo ku siin kara adiga macluumaad dheeraad ah sida la xiriirta falalka iyo dacwadahan.

WAXA KU DHACA HANTIDA WAKIILKAYGU UU IIBIN KARO MARKA LAYGA SII DAAYO MUSALIFNIMADA?

Wakiilkaagu wuxuu haynayaa wixii hanti ah ee aan la iibin kahor intaan lagaa siideyn (dhammaadka musalifnimada). Wakiilkaaga waxaa laga yaabaa inuusan awood u lahayn inuu toos u iibiyo hantidaada waxaana laga yaabaa inay qaadato waxoogaa sannado ah.

Haddii dhammaan deyn bixiyahaagu oo ay la socoto lacagta deyn wakiilkaaga iyo kharashaadka la bixiyey, wixii hanti ah ee hadhay waa laguu soo celinayaa waana la baabiinayaa musalifnimadaada.

B. DAKHLIGAAGA & SHAQADAADA

Sharciga Musalifka ma soo saaro wax xaddidaad ah oo shaqada ah wixii mihnad ah ama shaqo. Waxaad sii wadi kartaa inaad shaqeysato dakhli iyo/ama raadin kartaa fursado kale oo shaqo.

Waa inaad ogaataa si kastaba ha ahaatee jamciyadahaas mihnadeed ama ha 'yadaha laysan bixinta waxay soo saari karaan xaddidaado qaarkood ama xaalado haddii xubin ama laysanka qof ka leh oo uu noqdo musalifka.

Guud ahaan dawladaha gobolka waxay maamulaan sharci maamula xaq u yeeshada mihnadaha gaarka ah (tusaale, dhisayaasha, wakiilka dhulalka, iwm) intii meesha qaranka ama gobolka oo ku saleysan jamciyadaha shaqo aqooneedka ku saleysan iyo/ama golayaasha dastuurka inuu dejiyo shuruudaha xaq yeelashada ee xirfad aqooneedyo gaar ah (sida xisaabiyayaasha, sharci yaqaanada, wakiilada cashuurta iwm). Waa inaad ka jeegaraysaa ha'yada laysan bixinta ee khuseysa ama ururka aqoonyahanada si loo xaqiijiyo in musalifnimadu ay ku leedahay wax saameyn ah awoodaada aad ku sii soconeyso in mihnada ama xirfad aqooneedka.

Sharciga Shirkadaha sida waafaqsan waxaa laguu diidayaa inaad shirkad maamusho intaad musalifka tahay adoon ogolaansho ka heysan maxkamad.

MAXAA KU DHACAYA DAKHLIGEYGA INTAAN MUSALIFKA AHAY?

Haddii cashuurta dakhliga ka dib ay ka badato ilaa caddad, waa inaad wax ka bixisaa dakhligaaga oo aad siisaa wakiilkaaga.

Haddii aad tahay qof dakhligiisu hooseeyo waxba kama bixin doontid. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad lacag ikhtiyaari ah ka bixisid wakiilka.

HADDII AY TAHAY INAAN WAX KA BIXINO, WAA INTEE?

Waxaa lagaa baahan doonaa inaadka bixiso hal iyo badh caddadka uu dhaafo dakhligaagu cashuurta ka dib caddadka cayiman ee qoran waa tusaale 50 senti $1 ee kasta ee caddadka dheeraadka ah.

(Ogow: 'dakhliga'ee ujeedooyinka dakhliga wax ka bixinta sida waafaqsan Sharciga Musalifnimada waxay leedahay micne balaaran waxaana ku jira caddad aan ku jirin dakhliga la cashuurayo).

SIDEE BAA WAX BIXINTAAN LOO XISAABIYAA?

Markuu bilowdo musalifnimadaadu wakiilkaaga ayaa xisaabin doona in lagaaga baahan doono inaad dakhligaaga wax ka bixisid inta lagu jiro sannadka koowaad ee musalifnimadaada. Sidoo kale, wakiilka ayaa ku celin doona nidaamkaas bilowga sannad kasta oo ku xigga ee musalifnimadaada.

Xisaabinta waxaa loo sameeyaa iyadoo la isticmaalayo formulaha soo socda:

'Dakhliga la qiimeeyey' la gooyey 'Xadka dhabta ah ee dakhliga'

2

WAA MAXAY DAKHLIGA LA QIIMEEYEY?

Dakhliga loo qiimeeyey ujeedooyinka musalifnimada waxaa ka mid ah lacagtaad shaqeysato, mushaarkaaga ama wixii faa'iido kale ee lacageed ee aad ka hesho ilaha kala duwan oo laga gooyey cashuurta aad bixisay ama aad bixin doonto (oo ay ku jirto lacagta Medicare ka) caddadkan oo kale iyo haddii ay khuseyso, lacagta carruurta lagu taageerayo ama lacag bixinta carruurta. Waxaa ka mid ah:

- Mushahaarka (oo ay ku jiraan shaqooyinka labaad)
- Lacagta cashuurta lagaaga soo celiyo sannad xisaabeedka inta musalifnimada lagu jiro
- Lagaha loo shaqeeyahaaga ama kuwa kale sida (tusaale isticmaalka gaariga, kirada oo lagaa kabo)
- Nidaamka mushaarka qaar aan lagaa cashuureynin
- Faa'iidooyinka ganacsiga
- Lagaha ceydha qaarkood iyo hawlgabka
- Dakhliga aad shaqeysato ee qofkale la siiyo.

Wakiilkaaga ayaa awoodi doona inuu ka jawaabo wixii su'aalo ah ee aad qabto kuna saabsan waxa dakhli ahaanta ka midka ah.

Digniin:

Waa inaad u sheegtaa dhammaan lacagaha ceydha iyo dhakhliyada wakiilkaaga. Ciqaabo ayaa ka imanaya wixii aan la sheegin.

Wakiilkaaga ayaa xisaabin doona dakhligaaga la qiimeeyey isagoo:

- Go'aaminaya dakhliga kaa soo gala ilaha oo dhan
- Kana jaraya cashuurta dakhligaaga, lacagta Medicare ka iyo lacagta taageerada carruurta ama lacag bixinta lagu kabo.

WAA MAXAY XADKA CADDADKA DHABTA AH EE DAKHLIGA (AITA)?

AITA (qiyaastii 3 1/2 oo jeer heerka lacagta hawlgabka ee ugu badan) waxay ku saleysan tahay lambar la kordhiyey wuxuuna isu bedelaa si xilli xilli ah*. Haddii aad leedahay dadkugu tiirsan xadka dakhligu wuu kordhaa sida waafaqsan tirada dadka kugu tiirsan.

Tusaale

Bob wuxuu filayaa dakhligiisa cashuurta ka hor 12 bilood ee ugu horeeya ee musalifnimadiisa inuu noqdo $65 000. Wuxuu leeyahay hal ku tiirsane.

Tallaabo 1: Wakiilka ayaa xisaabinaya dakhliga qiimeeyey ee Bob.

Dakhliga cashuurta ka hor ee la filayo	$65 000.00
Ka goo cashuurta dakhliga	$13 524.66
Ka goo lacagta Medicare ka	$975.00
Dakhliga la qiimeeyey	$50 500.34

Tallaabo 2: Wakiilku wuxuu xisaabiyaa AITA Bob.

AITA (leh 1 ku tiirsane)	$48 675.35*

Tallaabo 3: Wakiilku wuxuu isticmaalaa dakhliga la qiimeeyey ee Bob iyo AITA si uu u xisaabiyo deynta sanneed ee intuu bixinayo.

$50 500 – $48 675* = $1 825 ÷ 2 = $912

Bob wuxuu helaa ogeysiiska qiimeynta , oo ka doonaya inuu ku bixiyo $912 ilaa $35 labadii toddobaadba. Waxaa laga yaabaa inuu bedelo nidaamka wax bixinta wakiilku haddii Bob lacagta loo siiyo bille ahaan ama dakhligiisu uu yahay mid xiliyeed.

OGEYSIISKA QIIMEYNTA

Wuxuu kuu soo diri doonaa ogeysiiska qiimeynta wakiilkaagu oo leh:

- caddadka aad bixineyso (haddii ay wax jiraan)
- sida caddadka loo xisaabiyey
- taariikhaha lacagta lagaa rabo.

CAWAAQIBKA BIXIN LA' ÁANTA LACAGTA

Wakiilkaaga ayaa laga yaabaa inuu ku:

- garnishee (si toos ah uga goynta ka raali ahaansha la'aantaada) lacag dakhligaaga ama xisaabta bangigaaga ama qof saddexaad oo lacag kuu haya, iyo/ama
- balaari musalifnimadaada ilaa shan sanno oo u qiimee lacag bixin dheeraad ah xilligaan, iyo/ama
- hel go'aanka lacagta aan la bixin oo qaad fal dhaqangelin ah ka dib marka lagaa sii daayo
- kaa doono furitaanka xisaab bangiyeed la kormeero oo laga bixiyo dhammaan dakhligaaga oo dhan oo uu idmo wakiilku dhammaan waxa lagala baxayo.

KAWARAN HADDII XAALADAHEYGU AY ISBEDELAAN?

Waa inaad wargelisaa wakiilkaaga isla markiiba haddii dakhligaagu ama tirada ku tiirsanayaashaadu ay isbedelaan, ama aad u maleynayso faahfaahintaan inay isbedeli doonto 12 bilood ee soo socda. Haddii aad ku guuldareysato inaad sidaas sameyso, qiimeyntaada waxaa laga yaabaa inay noqoto midaan sax ahayn waxaana laga yaabaa inaad bixiso wax fara badan ama inaan ku filneyn.

Dhammaadka 12 bilood ee kasta wakiilkaagu wuxuu dib u qiimeyn doonaa waxaad ka bixineyso deyntaada oo ku saleysan dakhligaaga dhabta ah iyo ku tiirsanayaasha xiligaas. Haddii aadan bixin wax kugu filan sababtoo ah dakhligaagu ayaa ka weynaa intii aad qiyaasaysay ka dib waa inaad bixisaa farqiga. Haddii aad bixisay wax fara badan lacag bixinta dheeraad ka ah dib laguuguma soo celin doono laakiinse waxaa laguugu xisaabinayaa qiimeynta ku xigta.

BEDELAADA DHAQAALO XUMADA DARTEED

Asalka fakhriga wuxuu ku xaddidan yahay xaallado laga soo reebayo ee ku dul saari kara adiga dhibaato maaliyadeed oo xad dhaaf ah oo ay ka mid yihiin:

- kharashaad daawo oo joogta ah
- kharashka xannaano maalmeedka carruurta ee muhiimka u ah shaqada
- kiro koreysa
- kharashaad safar shaqo tag iyo ka imaansho fara badan, ama
- waxbixinta oo lunta, ee badanaa uu/ay sameyso saygaagu/ooridaada ama qof kula degan, ee kharashka guriga ku baxaya.

La xiriir wakiilkaaga wixii macluumaad dheeraad ah haddii ay kula tahay inaad xaq u leedahay bedelaada dhaqaalo xumada darted. Codsiyada dhaqaala xumadu waa inay qoraal ahaadaan iyo:

- sharax sababtaad ugu dhibtooneyso dhaqaalo xumada
- ku dar caddeyn dukumiintiga dakhligaaga iyo kharashkaaga ah.

Wakiilkaaga ayaa go'aan ka gaaraya codsigaaga 30 maalmood gudahood oo ku siinaya ogeysiis qoraal ah oo dejinaya sababahooda.

DIB U EEGID

La xiriir wakiilkaaga haddii aad diido qiimeynta aad bixineyso ama go'aanka aad ku diideyso bedelaada dhaqaala xumada. Haddii aad weli ku diidan tahay waxaa laga yaabaa inaad ka codsato dib u eegid Kormeeraha Guud. Codsiga dib u eegista wuxuu u baahan yahay inuu qoraal ahaado oo la soo xareeyo 60 maalmood gudahood marka lagu soo ogeysiiyo qiimeynta . si kastaba ha ahaatee, waa inaad weli sameysaa lacag bixino inta lagu jiro xiliga racfaanka.

C. DEYMAHA IYO DEYN BIXIYAHA

MAXAA KU DHACAYA IYAGA HADDII AAN MUSALIF NOQDO?

Mar haddii aad musalif noqoto, deyn bixiyaha aan dammaanada lahayn waa inuu joojiyaa inuu kula soo xiriiro. Si loo hubiyo inay tani dhacdo waa inaad ku taxdaa dhammaan deymahaaga Qoraalka Arimahaaga markaad dalbaneyso inaad noqoto musalif, oo ay ku jiraan:

- deymaha aad qofkale wada qabtaan
- wixii deymaha ee aad ka qabto saaxiibo iyo qaraabo
- deymaha weli lagaa rabo inaad bixiso haddii aad musalif tahay.

Musalifnimadaadu ma saameyn doonto xuquuqda deyn bixiyaha inuu daba galo qof kale , sida:

- qofka labaad ee dammiinka ka ah deyntaada
- deymaha labada magaca leh ee qofka kale (tusaale xaaskaaga ama ninkaaga).

DEYMAHA WELI LAGAA RABO INAAD BIXISO INTAAD MUSALIFKA TAHAY

Waa inaad bixisaa:

- deymaha aan lagu caddeyn Karin musalifnimada tusaale:
  - ciqaabaha iyo ganaaxyada ay soo saartay maxkamad
  - waxyeelada shilalka (tusaale, shilalka baabuurta) marka laga reebo xaaladaha qaarkood
  - caawimaada ardeyga/deymaha dheeraadka ah
- wixii deymo cusub ah ee aad gasho ka dib markuu bilowdo musalifnimadaada.

Si aad isaga ilaaliso in lagaa joojiyo laysankaaga iyo/ama diiwaangelinta baabuurkaaga, waxaad u baahan doontaa inaad bixiso deyntaada gaari dhigashada, gaadiidka iyo ganaaxyada kale ee

sharciga dawlada. Gobolada badidoodu waxay leeyihiin
awooda ay ku joojin karaan laysanka iyo/ama diiwaangelinta baabuurka ilaa lacagta la bixiyo.

Haddii aad ku guuldareysato inaad bixiso deyntaada qaarkeed adeegyada muhiimka ah ee gurigaaga (tusaale, korontada, gaas, taleefanka) waxay keeni kartaa adeegyadaan in lagaa jaro.

Xafiiska Cashuuraha ee Australiya (ATO) waxaa laga yaabaa inay ceshadaan lacagta cashuurta ee laguu soo celinayo oo ay ku bixiyaan wixii deyn ah ee Dawlada dhexe kugu leedahay (tusaale ATO, Wakaalada Taageerada Carruurta).

DEYMAHA AAD BIXINEYSO KA DIB MARKA MUSALIFNIMADAADU DHAMMAATO

Inkastoo lagaa daayo ceymaha badidooda markuu dhammaado musalifnimadaadu, waxaa jira kuwa kale oo laga yaabo inaad weli bixiso in lagaa doonayo. Tusaale, musalifnimada ka dib waxaa laguu qaban doonaa inaad:

- Deymaha aad ku gashay wax isdaba marin
- Deymaha kabitaanka carruurta, oo ay ka mid tahay taageerada carruurta HECS kugu ururay (Qorshaha Lacag Bixinta Waxbarasgada Sare) iyo HELP deymaha (Barnaamijka Deynta Waxbarashada Sare).

SIDEE BAY U SAAMEYN DOONTAA DEYN BIXIYAHAYGA?

Deyn bixiyaha aan dammaanada lahayn guud ahaan waxay lumiyaan xuquuqdoodii ay ku heli lahaayeen deyntooda tusaale:

- bangiga, shirkadaha lacagta, ururada deymaha ee bixiya deymaha shakhsiyeed, kaararka dukaamada iyo credit kaarka
- adeeg bixiyaha , dhakhaatiirta, sharci yaqaanka iyo farsamo yaqaanka.

Haddii aad noqoto musalif, talaabo kasta oo sharci oo ay kaa qaadaan deyn bixiyaha aan dammaanada lahayn waa inay joogsataa,
Tusaale, u yeerida, lacag ka goynta dakhligaaga ama xisaabtaada bangiga ama lacag ka soo celinta sheriff ka ama mudaca.

Haddii deyn bixiyuhu uu sii wado doonida inaad bixiso deyntooda, waa inaad isla markiiba u sheegtaa wakiilkaaga oo wargelin doona deyn bixiyaha musalifnimadaada. Haddii lagugu dhibo ama khasbo deynta, waxaa laga yaabaa inaad macluumaad dheeraad ah ka raadsato Golaha Macmiilka iyo Tartanka Australiya website kooda ah www.accc.gov.au ama ka wac xarunta macluumaadka 1300 302 502 wixii khuseeya xuquuqdaada macmiil ahaan iyo nidaamka aad cabasho ku xareyn lahayd.

Deyn bixiyaha dammaanada leh waxay hantidooda u heystaan dammaanad oo xaq u siineysa inay qaataan oo iibiyaan haddii aad dib uga dhacdo lacag bixinta tusaale:

- bangiyada deynta u heysta guri
- shirkadaha deynta bixiya ee deynta abaartimatiga, kira iyo iibka baabuurka, alaabta guriga ama kuwa korontada
- nidaamka kireysi iibsiga ee aadan bixin lacagta oo dhan
- deyn bixiyaha ay dammaanada siisey sharciga dawladu ee guryaha iyo dhulka, sida golaha degaanka/shire lacagtooda iyo lacagaha biyaha.

Haddii aad rabtid inaad musalif noqoto, deyn bixiyaha dammaanada leh waxaa laga yaabaa inay kula soo xiriiraan si ay u ogaadaan waxa ku dhici doona hantida. Waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad wax sameyso si aad u sii heysato alaab dammaanad leh. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad hore ula hadashaa la taliyaha maaliyada ama wakiilka musalifnimada.

Qaar ka mid ah deyn bixiyaha waxaa laga yaabaa inay heystaan lahaanshaha alaab laga iibsaday ilaa deyntooda si buuxda loo bixiyo (tusaale, iibka hoos imanaya heysashada qoraalka lahaanshaha , alaabta la soo dhoofiyo ama mushqaayada ah) . deyn bixiyaha heysta debaajiga dammaanada ah ama debaaji (tusaale, mulkiilaha) waxay xaq u leeyihiin inay heystaan si ay u yareeyaan deyntaada.

Haddii aad dhib kala kulanto ka shaqeynta deyntaada iyo deyn bixiyaha, waa inaad la hadashaa

deyn bixiyahaaga, si aad u weydiisid haddii deyntaadu ay dammaanad leedahay iyo in kale. Waxaad sidoo kale awoodaa inaad la hadasho la taliyaha maaliyada haddii aadan hubin wax ku saabsan noocyada deymaha iyo deyn bixiyaha aad leedahay.

D. SAFAR DIBEDAAH

AUSTRALIYA MA KA BIXI KARAA HADDII AAN MUSALIF NOQDO?

Waxaad ka bixi kartaa Australiya oo kaliya haddii aad ogolaansho qoraal ah ka hesho wakiilkaaga ka hor intaadan bixin.

Wakiilkaagu wuxuu u baahan doonaaa inuu ku qanco inaad heysato sababo dhab ah ee safarka aad soo jeedisay tusaale:

- shuruuda shaqadaada awgeed, ama
- sababo Unaxariisasho awgood.

Wakiilkaaga waxaa laga yaabaa inuu kugu soo rogo markuu ku siinayo ogolaansho sida::

- xiliga safarka
- taariikhda lagaaga baahan yahay inaad Australiya ku soo noqoto, iyo/ama
- in wixii lacag bixin ah (lacagaha khasabka ah ee dakhligaaga in laga bixiyo si dib loogu siiyo deyn bixiyahaaga) in laguu qiimeeyey inaad bixiso in la bixiyo ka hor intaadan tegin.

Waxaa laga yaabaa inaad baasaboor heysato, si kastaba ha ahaatee, si kastaba ha ahaatee, waa inaad u dhiibtaa wakiilkaaga haddii laguu tilmaamo inaad sidaas sameyso.

Wakiilkaaga waxaa laga yaabaa inuu kuu diiyo ogolaansho haddii:

- aadan sameyn dhammaan waajibaadkaagii sida waafaqsan Sharciga Musalifnimada, tusaale soo xareynta Qoraalka Arimahaaga, ama
- waxaa lagaaga baahan yahay inaad ka caawiso wakiilkaaga maamulida musalifnimadaada, ama
- baadhitaanka wakiilka oo aan la dhameynstirin.

Digniin:
Haddii aad ka baxdo Australia ogolaanshaha wakiilkaaga la'aanteed ama aad ku baxdo ogolaansho laakiinse aadan soo noqon markii aad tiri waa soo noqonayaa, wakiilkaagu wuxuu xareyn karaa diidmada deynta in lagaa dhaafo. Haddii tani ay dhacdo, musalifnimadaada waxaa lagu sii kordhinayaa ilaa shan sanno laga bilaabo maalintaad Australia ku soo noqoto.

Haddii aad dibeda joogto oo wakiilkaagu uu ku weydiiyo inaad Australia ku soo noqoto oo aadan ku soo noqon, wakiilkaagu wuxuu xareyn karaa diidmada ah inaan lagaa deyn deynta. Haddii ay tani dhacdo, musalifnimadaada waxaa lagu kordhin doonaa sideed sanno laga bilaabo taariikhda aad Australia ku soo noqotid.

Ka bixida ama iskudeyida inaad ka baxdo Australia ka raali ahaanshaha wakiilkaaga oo qoraal ah la'aanteed waa dembi sida waafaqsan Sharciga Musalifnimada. Ciqaabta tan waa ilaa saddex sanno oo xabsi ah.

Jebinta shuruuda safarka ee kugu soo rogay wakiilkaagu sidoo kale waa dembi sida waafaqsan Sharciga Musalifnimada. Ciqaabta tani waa ilaa 12 bilood oo xabsi ah.

SIDEE BAAN U DALBADAA OGOLAANSHO?

Isla markaad ogaato inaad u baahan tahay inaad Australia ka baxdo waa inaad la xiriirtaa wakiilkaaga oo aad xaaladaada kala hadashaa.

Haddii musalifnimadaada ay maamusho Wakiilka Rasmiga ah (AFSA), waxaa lagaaga baahan yahay inaad bixiso lacagta codsiga safarka dibeda.

Haddii wakiilka uu yahay Wakiilka Rasmiga ah, wuxuu door bidayaa inaad codsato ogolaanshaha dibed u safrida adoo ku codsanaya foomka ka raali ahaanshaha inaad dibeda u safarto' maadaama uu aqoonsado dhammaan macluumaadka oo baahan yahay si loo helo ogolaansho. Foomkan ka dib waxaa lala soo gudbin karaa lacagta codsiga safarka dibeda.

Wakiilkaaga waa inuu heystaa wakhti ku filan iyo macluumaad si uu u tixgeliyo codsigaaga. Codsigaaga waa inuu ahaadaa qoraal si wakiilkaagu u fahmo waxaad codsaneyso siduu yahay. Waxaa lagugu soo wargelinayaa isla markiiba go'aanka wakiilka iyo wixii shuruuda ah oo la saaray safarkaaga.

Haddii aadan ku qanacsaneyn go'aanka wakiilkaaga, iskudey inaad ku xaliso waxaad saluugsan tahay iyaga si toos ah. Haddii aadan weli ku naqansaneyn go'aanka wakiilkaaga, waxaa laga yaabaa inaad dalbato maxkamada Dawlada dhexe ama Maxkamada Hoose si ay dib ugu eegaan. Waa inaad doonataa tallo sharci ka hor intaadan sidaan sameyn.

E. SIIDEYNTA

WAA MAXAY KA SIIDEYNTA?

Micnaheedu waxaa weeye musalifnimadaada waa dhammaatay mana tihid musalif wixii hadda ka danbeeya.

GOORMA AYAA LAYGA SIIDEYNAYAA MUSALIFNIMADA?

Haddii aad noqoto musalif sababtoo ah waxaad soo gudbisay codsigaaga, waxaa si otumaatig ah lagaaga sii deynayaa saddex sanno iyo hal maalin ka dib markaad soo xareysay codsigaaga iyo Qoraalka Arimahaaga AFSA.

Haddii mid ka mid ah deyn bixiyahaaga uu kaa dhigay musalif, waxaa lagaaga saarayaa si otumaatig ah saddex sanno iyo hal maalin ka dib markaad buuxisay Qoraalka Arimahaaga AFSA. Waa muhiim inaad xareyso Qoraalkaaga Arimaha AFSA isla markiiba maadaaba wixii dib u dhac ahi uu micnahiisu yahay waxaad ahaaneysaa musalif wax ka badan saddex sanno.

Xaaladaha qaarkood, waxaad musalif ahaan kartaa wax ka badan saddex sanno. Tani waxay dhacdaa marka wakiilkaagu uu ku soo xareeyo diidmada in lagaa sii daayoAFSA.

MA INAAN DALBADAA IN LAYGA SIIDAAYO?

Uma baahnid inaad dalbatid in lagaa sii daayo. Waxaad ka heli kartaa caddeynta ka siideyntaada musalifnimada adoo:

- weydiinaya wakiilkaaga , ama
- adoo raadinaya diiwaanka dadweynaha,Tusaha Musalifnimada shakhsiyeed ee Qaranka (NPII), oo ay heyso AFSA iyo helida qoraal ku tusaya taariikhda lagaa siideynayo. Adeegani lacag ayuu joogaa.

MAXAA DHACAYA MARKA LAGAA SIIDAAYO KA DIB?

Magacaagu wuxuu ka muuqan doonaa diiwaanka dadweynaha (NPII) weligaa sidii lagaaga siidaayey musalifnimada. Ururada deynta ka warbixiya sidoo kale waxay hayaan diiwaanka musalifnimada. Diiwaanadaan waxaa la hayaa wakhti xaddidan xitaa ka dib marka lagaa siidaayey. Waxaad ula xiriiri kartaa si aad:

w u xaqiijiso inay cusbooneysiiyeen faylkaaga deynta si uu u muujiyo in hadda lagaa siidaayey

w u ogaato ilaa inta ay muujin doonaan diiwaankaaga musalifnimada ee faylkaaga deynta.

WAA MAXAY WAAJIBAADKEYGA SHARCIGA AH KA DIB MARKA LAYGA SIIDAAYO?

Maamulka musalifnimadaada waxaa laga yaabaa inay sii socoto ka dib marka lagaa siidaayo.

Wakiilkaaga waxaa laga yaabaa inuusan dhammeystirin baaritaanka ama iibinta alaabta, ama waxaa laga yaabaa inaad weli lacag ka bixineyso dakhligaaga.

- Waa inaad ka caawisaa wakiilkaaga inuu dhammeystiro maamulka musalifnimadaada.
- Waa inaad wargelisaa wakiilkaaga wixii isbedel cinwaankaaga ah ama xaaladaada maaliyadeed haddii sidaa lagaa codsado.
- Waa inaad bixisaa lacag ka bixinta dakhliga ee taagan.

WAA MAXAY DEYMAHA AAN BIXINAYO KA DIB MARKA LAYGA SIIDAAYO?

Haddii aad leedahay wax ka mid ah noocyadaan deymaha ah waxaa laga yaabaa inaad sii wado inaad bixiso xitaa marka lagaa siidaayo:

- Ciqaabaha iyo ganaaxyada maxkamada ku saartay
- Magdhowga waxyeeladda shilalka (tusaale, shilalka baabuurta) ilaa , musalifnimada ka hor, wadarta waxyeelada waxaa xukuntay go'aan maxkamad ama waxaad u qortay heshiis dhinaca kale
- Deymaha taageerada carruurta
- Deymaha ku kabida carruurta
- Deymaha ardeyda ee HELP iyo deynta ardeyda (la xiriir Xafiiska Cashuuraha Australiya haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah)
- Deymaha aad ku gashay isdaba marinta.

KA WARAN HANTIDEYDA?

Wixii hanti ah ee aad heshay kahor ama intii aad musalifka ahayd weli waxaa iibin karaa wakiilkaaga ilaa xili cayiman. Kuwani si otumaatig ah laguuguma soo celinayo ka dib marka lagaa siidaayo.

MUSALIF MA NOQON KARAA SADDEX SANNO WAX KA BADAN?

Musalifnimadaada waxaa laga yaabaa in lagu kordhiyo shan sanno ama siddeed sanno haddii wakiilkaagu uu xareeyo diidmo siideyntaada AFSA.

Wakiilkaagu waxaa laga yaabaa inuu xareeyo diidmo dhawr sababood awgood, sida inaad ku guuldareysatay:

- Bixinta macluumaadka, iyo inuu ku caawiyo, wakiilaaga
- U sheegida wakiilkaaga dhammaan dakhliga w bixinta dakhliga la qiimeeyey
- Sharax sida lacagta loo kharashgareeyey, ama
- Muuji dhammaan hantida iyo deyn bixiyaha.

Hal diidmo wax ka badan ayaa la xareyn karaa.

Waxaa laga yaabaa inaad codsato dib u eegida Kormeeraha Guud. Codsi qoraal ah oo dib u eegis ah waa la xareeyaa 60 maalmood gudahood ee marka lagu soow argeliyo diidmada. Kala xiriir AFSA wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dib u eegista diidmooyinka.

F. TIRTIRIDA

WAA MAXAY TIRTIRIDU?

Tirtiridu waa kansalgareynta musalifnimada. Waxaa jira saddex siyaalood oo loo kansali karo musalifnimada:

i. Deymaha deyn bixiyaha oo ay ku jiraan dulsaarka iyo lacagaha wakiilka iyo kharashaadka si buuxda ayaa loo bixiyey.

ii. Deyn bixiyahaagu waxay aqbaleen qaabka iyo nidaamka oo ah wax kale oo ka yar lacagta oo si buuxda loo bixiyey.

ii. Codsiga maxkamada ee xaaladaha xaddidan qaarkood.

Saameynta tirtirida:

- Kansalidaada waa lagu diiwaangelinayaa diiwaanka dadweynaha, Tusaha Musalifka Shakhsiyeeed ee Qaranka (NPII) Keydka, si kastaba ha ahaatee.
- Hintida uusan u baahneyn wakiilkaagu si uu lacag u siiyo deyn bixiyahaaga, kharashka iyo lacagta ujrada ah waa laguu soo celinayaa.

I. KANSALIDA IYADOO LACAGTA OO DHAN LA BIXINAYO

Musalifnimadaada waa la kansalayaa haddii la helo in:

- Deyn bixiyahaagu, iyo wixii dulsaar ah laga bixinayo deynta deyn bixiyaha, lacagta laguu garto, iyo kharashaadka wakiilkaaga iyo lacagta in dhammaanteed si buuxda loo bixiyey.

La xiriir wakiilkaaga si aad u ogaatid ilaa inta lagaa rabo inaad bixiso. Lacagta la rabo in loo bixiyo si buuxda badanaa waxay ka timaadaa iibinta hintida ee wakiilkaaga ama il uusan helaynin wakiilku, sida lacagta uu bixiyey qof qaraabo ah. Musalifnimadaada waxaa la kansalayaa taariikhda lacagta ugu danbeysa laga sameeyo gurigaaga.

II. KU KANSALIDA NIDAAM AMA SIDII LA XAQIIJIYEY

Nidaamka ama sida la xaqiijiyey waa soo jeedino ay sameeyeen musalifyadu iyagoo adeegsanaya wakiiladooda si ay dhammeeyaan deyntooda. Deyn bixiyuhu wuu u codeeyaa inay aqbalaan soo jeedintaan . soo jeedintu:

- waxaa laga yaabaa inay lug ku yeelato haddaba musalifnimada
- waxaa laga yaabaa inay ka mid noqoto lacag kale ama hanti kale oo aysan caadi ahaan helaynin deyn bixiyuhu, sida lacagta uu bixiyey qaraabadu.

Lacag bixinadaan waxay faa'iido u leeyihiin deyn bixiyaha maadaama ay helaan lacag aan haddii kale la heleen.

Dhammaan deyn bixiyuhu waxay heli doonaan heer isku mid ah oo lacag ah ilaa lacag soo jeedintaadu ay wax kala siiso mooyee.

Soo jeedintaa qoraalka saxiixan ahi waa in lagu xareeyaa wakiilka:

- dejinta shuruudaha
- bixinta lacag bixinta kharashaadka iyo lacagta ujrada wakiilka.

Ka hor intaadan gabagabeyn waxaad soo jeedineyso weydiinta wakiilkaagu inuu Waco deyn bixiyaha si ay si toos ah ugu tixgeliyaan, waa inaad ka hadashaa:

- waxa lagaa rabo ee ah sameynta wax soo jeedin iyadoo uu kula jiro wakiilkaagu
- wixii soo jeedin ah ee deyn bixiyaha ugu weyn si aad u ogaato haddii la aqbali karo.

Wakiilkaaga waxaa laga yaabaa inuu:

- u baahan yahay debaaji si uu u daboolo kharashaadka iyo lacagta ujrada ah ee kulanka, ama
- diido u yeerida kulan haddii wax soo jeedintani aysan sameyn wax bixin ku filan ee bixinta lacagta ujrada ah ee wakiilka ee ay aqoonsadeen deyn bixiyuhu ee aan guriga bannaanka looga qaadi karin.

Kulanka deyn bixiyaha

wakiilkaaga waxaa laga yaabaa inuu u yeero kulanka deyn bixiyaha si ay uga fekeraan oo ugu codeeyaan wax soo jeedintaada. Ogeysiiska kulankan waxaa lagu daabici doonaa website ka AFSA (www.afsa.gov.au). Deyn bixiye kasta waa loo diri doonaa:

- ogeysiiska iyo cinwaanada lagaga hadlayo kulanka
- nuqulka waxaad soo jeedisay

- warbixinta wakiilkaaga.

Waa inaad ka soo qaybgashaa kulanka haddii uu kaa codsado inaad sidaas sameyso wakiilkaagu. Waxaa laga yaabaa inaad wax ka bedesho shuruudaha wax soo jeedinta kulanka laakiinse aan ahayn sina lagu yareynayo lacagta wakiilka.

Warbixinta wakiilka

Warbixinta deyn bixiyaha waa inay sheegtaa haddii ay ka faa'iidayaan haddii la aqbalo soojeedintaan oo u sheeg:

- yaa bixinaya lacagta
- faahfaahinta hantida, garashada, iyo lacagta faaíidada ah
- kharashaadka iyo lacagta ujrada wakiilka
- faahfaahinta waxqabadkaaga iyo macaamilkaaga maaliyeed.

Aqbalaada deyn bixiyaha ee waxaad soo jeedisay

Aqbalaadu waxay u baahan tahay çodaka 'haa'ee inta ugu badan ee deyn bixiyaha coddeeya ilaa intay ka metelayaan ugu yaraan 75% ee dalabkooda ee qiimaha doolarka.

Haddii la aqbalo wax soo jeedintaada

Musalifnimadaada isla markiiba waa la kansalayaa iyo:

- lacagaha la soo dalacay iyo lacagta ujrada wakiilka waa la bixinayaa
- deyn bixiyahaaga lacagta waa la siinayaa.

Dhammaan deyn bixiyaha leh deynta la dalban karo intaad musalifka tahay waxaa xiraya shuruudaha waxa la soo jeediyey.

Haddii la diido wixii aad soo jeedisay

Musalifnimadaadu way sii soconeysaa. Wakiilkaaga ayaa:

- heyn doonaa lacag dabooli karta kharashaadka iyo lacagta ujrada ah ee loogu wacayo kulan dabaaji kasta
- celi lacag kasta oo laguu siiyey wax soojeedintaan awgeed.

Wax ka bedelida garashada iyo nidaamka

Deyn bixiyahaagu wuxuu ku raaci karaa inuu kala duwo garashadaada ama nidaamka.

Dhinac dhigida iyo joojinta

Deyn bixiyuhu ama wakiilka ayaa ka dalban kara Maxkamada Dawlada dhexe ama Maxkamada Hoose ee Dawlada dhexe inay dhinac u dhigto garashadaada ama nidaamka lagu heshiiyey haddii:

- aysan macquul ahayn
- ma raacsana Sharciga Musalifnimada
- aad bixisay macluumaad been ah ama jahawareer leh, ama
- inaad jebisay shuruudihii wax ka mid ah.

Deyn bixiyaha ama wakiilka wuxuu bixin karaa codsi si uu mar labaad kaaga dhigo musalif isla wakhtigaas sida dalbashada inaad hesho garasho ama nidaamka dhinaca la dhigay ama la joojiyey.

III. KU KANSALIDA AMAR MAXKAMADEED

Haddii aad u maleynaysid inaan lagaa dhigin musalif ama inaadan xareyn codsiga deyneysanaha, waxaad ka dalban kartaa maxkamada in musalifnimadaada la kansalo. Waa inaad u heshaa taladaada sharci oo tan ku saabsan.

G.KHARASHKA IYO LACAGTA UJRADA

Wakiilka wuxuu xaq u leeyahay lacag bixinta ujrada si uu u maamulo musalifnimadaada.

Meesha Wakiilka Rasmiga ahi uu yahay wakiilka maamulka, lacagta ujrada ah waxaa dejiya sharciga guud ahaana waxay ku saleysan tahay boqolkiiba lacagta la aqoonsaday*. Lacagta ujrada ahi si toos ah loogama heli karo adiga ilaa inaad doonesyid in musalifnimada lagaa kansalo mooyee.

Halka wakiilka diiwaanka gashani uu yahay wakiilka maamulka, lacagta ujrada waxay badanaa ku saleysan tahay heer saacadeed. Halka ay jirto lacag aan ku filneyn maamulka, wakiil diiwaangashan ayaa heli kara lacagta ujrada dastuuriga ah ee ugu yar* ^.

Haddii aadan ku qanacsaneyn caddadka lacagta ujrada ah ee uu soo dalacday wakiilku waxaad codsan kartaa dib u eegid madax bannaan oo ah mushaarka wakiilka (oo ay ka mid tahay lacagta ujrada iyo kharash bixinta) inuu sameeyo Kormeeraha Guud ee Musalifka. Kormeeraha Guud ee Musalifka ayaa sameyn doona dib u eegista iyadoo laga doonayo in shuruudaha qaarkood la fuliyo. Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan tixraac Jihada 16 ee Waxqabadka Kormeeaha Guud (www.afsa.gov.au).

Lacagaha la aqoonsaday ama helay wakiilku ee maamulka waxay hoos imanayaan in lacag lagu dalaco* (khidmada dawlada) oo uu bixiyey wakiilku si toos ah dawlada . wixii dulsaar ah ee lacagta uu helay wakiilka ay dhasho hesho waxaa la siinayaa dawlada.

*Fadlan eeg lacagta lagu dalacay iyo ujrada AFSA waxaa laga helayaa website ka AFSA

^ ma khuseyso musalifnimada bilowdayI Diiseembar ama ka dib ee 2010